

Xarunta Soo kabashada Musiibada oo laga furayo Jackson

Release Date: Ogosto 10, 2024

ST. PAUL – Xarunta Kasoo kabashada Musiibada ee FEMA/Gobolka ayaa la furi doontaa Axadda Agoosto 11, 2024, si ay uga caawiso dadka deegaanka inay bilaabaan kasoo kabashadooda ka dib duufaannadii iyo daadadkii darnaa ee Juun 16 - Luulyo 4.

Khabiiri ka socda FEMA, gobolka Minnesota iyo Maamulka Ganacsiga Yaryar ee Maraykanka ayaa joogi doona xarumaha si ay u caawiyaan badbaadayaashu inay codsadaan kaalmada musiibada federaalka, soo geliyaan dukumeentiyada, in su'aalhooda shaqsi ahaan looga jawaabo, helaan noocyada kale ee caawimada ee laga yaabo in la heli karo oo ay bartaan siyaabo si ay hantidooda uga dhigaan kuwo u adkaysta masiibada.

Xaruntan waxay ka furnaan doontaa meelaha soo socda, maalmaha iyo saacadaha

Jackson City Hall

80 West Ashley Street

Jackson, MN 56143

Saacadaha: Isniin. – Qorraxda. 7:30 subaxnimo - 6:30 galabnimo

FIIRO GAAR AH: Xaruntan waxaa la xirayaa maalinta Talaadada ah ee ku beegan 13 ka Agoosto doorashada. Waxay dib u furmi doontaa hawlihii caadiga ahaa maalinta xigta.

Xarumo soo kabasho oo dheeri ah ayaa dhawaan laga furi doona gobolada kale ee ay saamaysay. Si aad u hesho xarunta kuugu dhow, booqo [FEMA.gov/DRC](https://www.fema.gov/DRC). Badbaadayaashu waxay booqan karaan xarun kasta si ay u caawiyaan.

Kaalmada luqadaha aan Ingiriisiga ahayn, oo ay ku jiraan luqadda dhegoolaha ee Ameerika, iyo agab la turjumay ayaa laga heli karaa xarumahan. Goobaha Xarunta Soo-kabashada Musiibada waxaa loo doortaa gelitaankooda, iyadoo



FEMA

Page 1 of 2

ujeedadu tahay in la gaaro inta ugu badan ee suurtoogalka ah. Goobaha baabuurta la dhigto ee la heli karo ayaa laga heli karaa xarumaha oo dhan.

Badbaadayaashu uma baahna inay booqdaan Xarunta Soo kabashada Musiibada si ay u dalbadaan gargaarka FEMA. Si aad u codsato adigoon booqan xarun, online gal [DisasterAssistance.gov](https://www.fema.gov/disaster), soo deji [FEMA mobaylka](https://www.fema.gov/mobaylka) abka ama Khadka caawinta ee FEMA wac 800-621-3362. Haddii aad isticmaasho adeegga gudbinta sida adeegga gudbinta fiidiyowga, adeegga taleefanka qoraalka ah ama kuwa kale, sii FEMA lambarkaaga adeeggaas markaad dalbato.

Xitaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hawlgalka soo kabashada masiibada ee Minnesota, booqo www.fema.gov/disaster/4797.



FEMA

Page 2 of 2